

# Ma u baahan tahay daryeelka caafimaadka bilaashka ama kharashka hooseeya?

## Waanu ku daboolnaa

*Kuray badan iyo dhalin yaro yar waxay u qalmi karaan daboolida daryeelka caafimaadka bilaashka ah ama kharashka hooseeya dhexda Washington Apple Health (Medicaid).*

### Maxaan ugu baahdaa daboolida caafimaadka?

Daboolida caafimaadki waxay kaa caawin kartaa daryeelka aasaasiga ah ee daryeelka dadka dhalin yarta ah—booqashooyinka dhakhtarta, daryeelka haddii aad jiranaato ama dhaawacanto, caabuqa galmo ahaan la isugu gudbiyo (STI) baadhitaanada, dawo qorida, iyo cusbitaal dhigida.

Dabooida caafimaadka sidoo kale waxaa ku jira dawada ka hortagga uurka, daryeelka uurka ama joojinta uurka, caafimaadka maskaxda, iyo adeegyada isticmaalka maandooriyaha.

### Ma heli karaa daboolida caafimamadka haddii aan ahay 19 ama ka way nahay?

Haa! Waxaa jira doorashooyinka daboolida caafimaadka la awoodi karo ee kurayda iyo dhalin yarada. Waxaad u qalmi kartaa daboolida bilaashka ah haddii aa dla kullanto heerarka dakhliga ama aad ku jirtay daryeelka korinta.

### Ma heli karaa daboolida caafimaadka aan lahayn waalidkay?

Haa! Haddii aad tahay da'da 18 ama ka yar tahay waxaad awood u yeelan doontaa inaad hesho daboolida caafimaadka iskaa ah hadidi aad:

- Ku nooshahay meel ka gooni ah waalidkaa/masuulada oo aanay iyagu kuu sheegan inaad cashuurta ugu tiirsan tahay.
- Aad uur leedahay.
- U baahan tahay xakamaynta dhalmada ama daryeelka STI.

Haddii aad qabto su'aalo ama aad umalaynayso inaad ku jirto mid ka mid ah xaaladahan, waa inaad kala xidhiidhaa Washington Healthplanfinder lambarka 1-855-923-4633 si aad u codsato daboolida (kama codsan kartid websaydka). Markaas soo wacdo, dheh: "Waxaan u baahanahay inaad codsado Apple Health". Waxay kuu gudbin doonaan qof ku siin kara caawimo bilaash ah oo qarsdoodi ah si loo fahmo doorashooyinkaaga.

### Sideen ku codsanayaa?

Waxaad u qalantaa daboolida bilaashka ah ama kharashkeedu hooseeyo. Hadda codso!

- Onlayn: Booqo **wahealthplanfinder.org** - dooro batanka "Apply Now".
- Abka Moobilka: Soo deji the WAPlanfinder app.
  Telefoonka: Soo wac Washington Healthplanfinder lambarka 1-855-923-4633.
- Warqadda: Ka soo dejiso codsiga bogga **hca.wa.gov/health-care-application**.
- Qof ahaan: Ilaha maxaliga ah kaas, oo aan kharash dheeraad ah kugu joogin, ayaa kaa caawin kara codsiga daboolida caafimaadka. Booqo **wahealthplanfinder.org** - Ka hel kaaliye dhexda linkiga taageerada macmiilka.

Washington Apple Health

Washington State Health Care Authority

Marka aad diyaar tahay inaad codsato, waxaad u baahan doontaa:

- Dakhliga bisha.
- Lambarka Amniga Sooshalka.
- Taariikhda Dhalashada.
- Macluumaadka sharciga socdaal, haddii ay adiga kugu habboontahay.
- Cinwaanka Boostada.
    - Haddii aanad haysan cinwaanka boosyadda, waxaad isticmaali kartaa cinwaanka saaxiib ama qaraabo, ama cinwaanka hoyga dhalin yarada ama dugsiga.

## Hadda ka hor haysta daboolida caafimaadka?

Haddii aad hadda ka hor helayso Apple Health, waxaad u baahan tahay inaad cusboonaysiiso daboolidaada.

- Haddii aad tahay 19 sano jir ama ka wayn tahay, dib u cusboonaysii onlay boga **wahealthplanfinder.org**.
- Haddii aad tahay 18 sano jir ama ka yar, waa inaad dib u cusboonaysiisaa daboolida addoo soo wacaya 1-855-923-4633

Si aad u hesho kaaliyaha qof ahaan ee bulshadda ku salaysan, booqo Washington Healthplanfinder bogga **wahealthplanfinder.org**.

## Su'aalo?

Noola soo xiriir caawimaad bilaash ah!
Haddii aad su'aalo ka qabto waxa ku saabsan daboolidan, soo wac 1-800-562-3022.

## Naafonimada hadalka ama maqalka, ama dhibaatooyinka dhaqdhaqaaqa

Haddii aad qabtid naafonimada maqalka ama hadalka ah ama dhibaato dhaqdhaqaaq, waa in aad u sheegtaa shaqaalaha soo-dhaweynta marka aad ballantaada sameysato. Shaqaalaha soo-dhaweynta jooga rugta bixisa adeeggaaga caafiaadka ayaa kugu caawin doona qabanqaabo kasta oo lagama maarmaan ah.

## Adeegyada turjubaanka

Haddii aadan si fiican ugu hadlin luuqada Af Ingiriiska ama aad tahay dhagoole, Indhoole Dhagool ah, ama uu Kugu Adag Yahay Maqalka, turjumaanno xirfadlayaal ah ayaa lagu heli karaa luuqado badan, oo ay ku jiraan luuqadda dhagoolayaasha ee tilmaan bixinta oo lacag la'aan ah. Ogeysii shaqaalaha soo-dhaweynta in aad u baahan tahay tujumaan marka aad ballanta qabsanayso. Macluumaadka dheeradka ah, booqo **hca.wa.gov/interpreter-services**.

## Adeegyada gaadiidka

Waxaad xaq-u-yeellan kartaa caawimaadda gaadiidka lagu tagayo ballantaada daryeelka caafimaadka oo lacag la'aan ah. Ballantu waa in ay noqotaa mid loogu talogalay adeegyada caymiska Apple Health. Haddii aad caawimaad ugu baahan tahay helitaanka gaadiid ama takhtar ku sugan degaankaaga, fadlan wac 1-800-562-3022. Macluumaadka dheeradka ah, booqo **hca.wa.gov/transportation-help**.

Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) wuxuu u hoggaansamayaa dhammaan sharciyada xuquuqda madaniga ah ee gobolka Washington iyo dowladda federaalka waxaana ka go'an in uu suurtageliyo in si siman loo helo adeegyadeenna. Haddii aad u baahan tahay diyaafadin, ama u baahan tahay dokumeentiyo ku qoran luuqad kale ama qaab kale ah, fadlan wac 1-800-562-3022 (TRS: 711).

